Xeer L. 36 rep.

Dhisidda guddi soo darsa kana soo baaraandega qaraarada gobollada ee arrimaha fulinta hawlaha dadweynaha ee Soomaaliya.

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAMULAHA

Marka uu arkay dekereetda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee 9 Disember 1952, lamba. 2357,

Marka uu garowsaday baahida lo qabo in lag kordhiyo guddiyada daraasaadka lagu sheegay dekereetada lamba. 145 ee taariikhda 13 Agoosto 1955 guddiyo kale;

Sida uu ku soo taliyay Agaasimaha Xeer-dejinta iyo Garsoorka uuna oggolaaday Agaasimaha Horumarka Dhaqaalaha;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA:

Qod. 1

Waxaa la dhisay, oo lagu kordhiyay guddiyada ku xusan dekereetada 145 ee 13 Agoosto 1955, guddi soo darsa kana soo baaraandega qaraarada gobollada ee arrimaha fulinta hawlaha dadweynaha ee Soomaaliya, kuwaasoo ka kooban sida soo socota:

Guddoomiye: Gr. Uff. Cenesio Ciccotti – Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha Gudd;
Ku-xigeen: dr. Francesco Scimone — Madaxa Xaafiiska Maamulka;
Xubin: Geom: Salvatore Alesanderello — Madex Qaybta Marinada Badda iyo Webiyada/toggagga;
Xubin: Mudane Cabdulqaadir Maxamed — Milkiilaha urur-hantiyeed Soomaali;
Xubin: Xaaji Naasir Cali — Qandaraasle;
Xubin: Maxamed Cosoble Cadda — ka spcda xisbiga L. G. S.;
Xubin: mudane Maow Aweys Xasa — ka tirsan Xisbiga U.G.B.;
Xubin: Mudane Xaaji Cabdullaahi Mursal — ka Xisbiga H.D.M.;
Xubin: Mudane Calasow Caddaawe oo ku magac “dheer” oo ka tirsan Xisbiga P.D.S

Muqdisho, 14 Feb. 1956.

Maamlulaha

Anzilotti

La hubiyay lana diwaangeliyay — Diw. lamba. 15 bogga lamba. 158

Mugadisho, 10 Abriil 1956.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**